# Waa maxay Qorshaha Hormarinta iyo Kormeerka Akhriska?

Qorshaha Hormarinta iyo Kormeerka Akhriska, mararka qaarkood loo yaqaan RIMP, waa dhukumiinti ay dugsiyadu isticmaalaan si ay ula socdaan sida ay uga taageeri doonaan ilmaha xirfadaha wax akhrinta iyo qoraalka haddii ilmuhu aanu keenayn ama ka saraynin dhibco cayiman ee imtixaanka akhriska ee fasalkooda. Midan waxay ka bilaabataa Fasalka Barbaarinta. Waxaad ka arki sambalka RIMP khadka onlaynka ah.

Sharci ahaan, dhamaan dugsiyada dadweynaha ee Ohio waa inay u sameeyaan Qorshaha Horumarinta iyo Kormeerka Akhriska ee ardayga aan jidka ku jirin (akhris ka hooseeya heerka fasalka), 60 maalmood gudahooda marka la helo natiijooyinka baaritaanka akhriska. Midan waxay qeyb ka tahay Sharciga Damaanad-qaadka Akhriska ee Fasalka Sadexaad ee Ohio (Ka eeg Xeerka Dib loo Eegay ee Ohio 3313.608).

### Waa maxay doorkayga waalid/masuul ahaan ee la xiriira Qorshaha Horumarinta iyo Kormeeritaanka Akhriska?

1. **Qorshuhu waa fursad aad si wada jir ah ula shaqayn karto dugsiga.** Degmadaada ayaa sharci ahaan looga baahan yahay inay adiga iyo macalinka fasalka ilmahaaga ay idinka qaybgaliyaan samaynta qorshaha. Qorshuhu waa inuu qeexaa taageerada akhriska iyo qoraalka ee ilmahaagu heli doono. Taageerada ku qoran qorshaha waa inay ku salaysan tahay xogta akhriska iyo qoraalka ilmahaaga, iyo fikradahaaga ku saabsan sida ugu wanaagsan ee ilmahaagu wax u barto.
2. **Qorshuhu waa dhukumiinti qoraal ah, kaas oo kaa caawin doona inaad la socoto horumarka ilmahaaga iyo taageerada uu bixiyo dugsigu wakhti kadib.** RIMP waxaa sii wadi doontaa in la cusboonaysiiyo oo la isticmaalo inta ilmahaagu ku jiro xirfadiisa waxbarasho ee K-12 ilaa ay wax uga akhrinayaan si waafaqsan heerka fasalka.
3. **Maadaama qorshuhu yahay mid gaar ah oo ku saabsan xirfadaha saxda ah ee ilmahaagu u baahan yahay inuu ku shaqeeyo, waxaad sidoo kale ka caawin kartaa ilmahaaga inuu ku shaqeeyo xirfadahaas wakhti ka baxsan wakhtiga dugsiga.**

**Tusaale**

Natiijooyinka Imtixaanka Baaritaanka Akhrinta ee ilmaha ayaa muujinaya inay u baahan yihiin taageero dheeraad ah si ay u akhriyaan dhawaaqyada ugu horeeya erayada. Qorshe (RIMP) lagu taageerayo ilmaha ayaa la qoraa oo lala wadaagaa waalidka ilmaha.

-----

Macallinka iyo waalidku ayaa kulmo oo mid kastaaba wuxuu wadaagaa fikradaha qorshaha, ku saabsan sidii ilmaha looga taageeri lahaa ku celcelinta dhawaaqyada iyo xarfahaas inta lagu jiro maalinta dugsiga. Waxay sidoo kalee qorsheeyaan marka ay dib u eegi doonaan xirfadaha ilmaha oo ay mar kale hadli doonaan.

-----

Dugsigu wuxuu wax ka badalaa qorshaha si uu ugu daro waxa ay kala hadleen kulanka waalidka waxa uuna qoyska u soo diraa nuqulka qorshaha.

Ilmahaagu wuxuu yeelan doonaa Qorshe Horumarineed iyo Kormeerka Akhriska ilaa ay wax uga akhrinayaan si waafaqsan heerka fasalka. Ardaydu waxay yeelan karaan RIMP ilaa fasalka 12[aad]. Dugsiyadu waxay sidoo kale u samayn karaan RIMP ardayda haddii ay jirto cadayn muujinaysa ardaygu inuu u baahan yahay taageero xaga akhriska, xitaa hadii ay ka sareeyaan dhibcaha heerka fasalka bilowga sanadka.

**Su'aalo miyaad qabta?** Iimayl ugu dir ThirdGradeGuarantee@education.ohio.gov.

Ohio Statewide Family Engagement Center at The Ohio State University

Department of Education & Workforce